

Ogow Xuquuqahaaga

Sidaad ogtahay, ICE aad ayay hawlgalo uga wadaa Minnesota iyadoo adeegsanaysa Hawlgalka PARRIS kaas oo bartilmaameedsanaya shakhsiyaadka haysta sharciga qaxootiga ee jooga Minnesota kuwaas oo aan weli helin deganaansho rasmi ah (kaararka cagaaran).

Waxaan maqalnay warbixinno sheegaya in qaxootiga haysta sharciga, laakiin aan haysan deganaansho rasmi ah, ay xireen ICE.

Waxaan kula wadaagaynaa macluumaadkan, si aad uga warhayso oo aad diyaar u ahaato. Fadlan si taxaddar leh u akhri qoraalka hoose.

Nabad ku joog guriga.

Hay'adaha fulinta sharciga oo ay ku jiraan ICE, CBP, ama hay'ad kasta oo kale, waa inay haystaan **warqad waaren ah oo maxkamadeed** si ay gurigaaga u soo galaan gurigaaga (ha noqdo guri ama abaartamenti). Dadka waxay xaq u leeyihiin inaysan albaabka furin haddii aysan jirin amar maxkamadeed oo hadda ah oo uu saxiixay garsoore, kaas oo oggolaanaya gelitaanka gurigaas gaarka ah.

Macluumaadka Aasaasiga ah ee Ogow Xuquuqahaaga waxaa halkan looga heli karaa 56 luqadood:

- Kaararka Cas / Tarjetas Rojas | Xarunta Kheyraadka Sharciga ee Qaxootiga | ILRC

U diyaargarow xarig/xiritaan.

- Dadka waa inay soo dejistaan ablikeeshinka **ReadyNow!** oo waa inay geliyaan xiriiradooda xaaladaha degdegga ah, oo ay ku jiraan macluumaadka xiriirka ee qareenkooda, maamulaha kiiska, qoyska, xarunta xannaanada carruurta, iyo macluumaad kale ee muhiim ah ee xiriirka. Haddii xiritaan uu soo dhawaado/lama huraan noqdo, waxay diri karaan farriimo badan marka la riixo hal badhan.
- Had iyo jeer sido nuqullada dokumentiyadaada socdaalka iyo aqoonsiga Gobolka (I-94, EAD, iyo MN ID).
- Deganaan iyo xasilooni muuji oo ka iska caabin xiritaanka, xitaa haddii aad u malaynayso in saraakiisha ku xiraya ay u dhaqmayaan si sharci darro ah.
- Xifdi lambarka taleefanka ee ugu yaraan hal qof oo aad ku kalsoon tahay oo aad la xiriiri karto.
- Haddii la xiro, dadka waxaa baaritaan loogu samayn doonaa Fort Snelling laakiin si dhakhso ah ayaa looga kaxayn karaa gobolka. Xubnaha qoyska waa inay haystaan liis ku

qoran magacyada, lambarka A, iyo waddanka ay ku dhasheen dhammaan xubnaha qoyska si ay qofka uga raadiyaan Nidaamka Raadinta Onlaynka ah ee Dadka La Xiray. Adeegyada sharciga ee u dhow xarumaha xabsiyada waxaa laga heli karaa www.ImmigrationLawHelp.org.

- Haddii lagu xiro oo aad ku sugan tahay MN, wac khadka caawimaada ee dadka la xiray inta lagu jiro saacadahan:

QAABILAADA MAXABUUSTA EE XABSIGA: Haddii ay ku xiraan Hay'adda Fulinta Sharciga ee Socdaalka iyo Kastamka (ICE) ama aad na soo wacayso adigoo matalaya qof ku jira gacanta Hay'adda ICE, fadlan wac 651-641-1011 Inta lagu jiro saacadaha soo socda si aad u hesho caawimaad:

Isniinta-Khamiista: 1-3 p.m.

Saacadaha shaqada ee khadadka xiritaanka khaaska ah:

Talaado, Janaayo 6: 1-3pm

Arbaco, Janaayo 7: 1-3pm

Khamiis, Janaayo 8 (saacadaha caadiga ah): 1-3pm

- Xasusnaaw, waxaad xaq u leedahay inaad iska aamusnaato! Haddii lagu xiro, HA diidin xiritaanka oo qofna HA kala hadlin xaaladdaada/aqoonsigaaga socdaalka - xitaa dadka kale ee la xiray. Kaliya kala hadal qareenkaaga. Sii wad sheegidda xaquuqaha aad leedahay: "Waxaan rabaa inaan aamusnaado" iyo "Waxaan rabaa inaan la hadlo qareen." HA saxiixin waxna marka laga reebo haddii aad la hadashay qareen. Khasab **kuguma ahan** inaad ka qaybqaadato waraysi ama inaad saxiixdo warqad ka hor intaadan la hadlin qareen.
- Afar Dukumentiyoo oo ay tahay inaad buuxiso oo aad saxiixdo **ka hor** inta aan lagu xirin, haddii ay suurtagal tahay:
 - [Iska Wareejinta Masuuliyadda Waalidnimada](#)
 - [Wareejinta Awoodda](#)
 - [ICE Form 60-001](#), iyadoo dhammaan xafiisyadaada Kongareeska lagu sheegayo qaybta "Ururka Qaataha": xafiiska Senatarka Amy Klobuchar, xafiiska Senatarka Tina Smith, iyo Wakiilkaaga MN.
 - [Ogaysiiska G-28 ee Soo Muuqashada Qareen ama Wakiil La Agoonsaday](#) ama *Foomka Ogaysiiska Wax Laga Beddelay ee Muuqashada hay'ad dib u dejin ama qof kale oo aad ku kalsoon tahay (oo soo socda).*
- Dib u eeg [Buug-yaraha U-diyaargarowga Musaafurinta Qoysaska](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo diyaargarooobo.

*Macluumaadka halkan lagu soo bandhigay waa in aan loo qaadan sidii talo sharciyeed ahaan
waana mid macluumaad bixin oo keliya.*

La kulan qareen si aad ugala hadasho xaaladdaada gaarka ah.